

Sharciyada qoriturka

Qabanqaabiyaha qoriturka

Shaqada gaarka ah ee dalka oo dhan ee horumarinta niyadda akhriska ee carruurta iyo dhallinyarta ee adeegyada maktabadda, maktabadda magaalada Seinäjoki. Alvar Aallon katu 14, PL 217, 60100 Seinäjoki.

Ka qaybqaadashada

Qoriturka waxaa laga qaybqaadanayaa muddada lagu sheegay waraaqda Bootinta Akhriska. Muddada ka qaybqaadashada wakhtiga ka baxsan foomyada ka qaybqaadashada ee la soo celiyo lama qiimeynayo.

Qoriturka waxaa looga qaybqaadanayaa in la buuxiyo foomka ka qaybqaadashada iyo macluumaadka xiriirka oo loo diro maktabadda qayb ka ah mashruuca Bootinta Akhriska.

Hirgalinta qoriturka

Dadka ku guuleysta qoriturka dhexdooda ayaa qoriturka loo qabanayaa bisha Sebtembar ee 2026-da.

Qabanqaabiyaha qoriturka ayaa qofka billadda ku guuleysta ku wargelinaya iimaylkiisa. Haddii qofka ku guuleysta la heli waayo 14 maalmood gudahood, ama haddii guuleystuhu uu diido inuu guddoomo billadda, qabanqaabiyaha qoriturka ayaa dib u qabanqaabinaya qoriturka oo guuleyste kale uga dooranaya ka qaybqaateyaasha.

Billadda

Ku guuleystaha qoriturku wuxuu helayaa kaar hadyad ah oo qiimihiisu yahay 50€ oo uu u helayo tukaanka buugaagta ee Suomalainen Kirjakauppa. Iskugayn saddex kaar oo hadyad ah oo midkiiba 50€ yahay ayaa loo qoriturayaa. Kaarka hadyadda waxaa lagu isticmaali karaa tukaanka Suomalainen Kirjakauppa iyo tukaankooda internetka ahba. Billadda lacag ahaan looma baddalan karo.



Macluumaadka xidhiidha ee ka qaybqaataha

Magaca iyo da'da ka qaybqaataha:

Magaca waalidka:

Cinwaanka iimaylka (waxaa loo baahanyahay haddii uu qofku badiyo):

.....

..... **Ku soo celi maktabaddaada!**

Ka baaraandegista macluumaadka shakhsiga

Qabanqaabiyaha qoriturku wuxuu macluumaadka ka qaybqaateyaasha u isticmaalayaa oo kaliya hirgalinta qoriturka iyo bixinta billadaha qoriturka.

Macluumaadka magaca iyo xidhiidhka khuseeya ee ka qaybqaatuhu uu bixinayo waxaa loo adeegsanayaa oo kaliya doorashada qofka badinaya, wargelinta guusha iyo u dirista billadda. Macluumaadka ka qaybqaatuhu uu bixiyo looma isticmaalayo loomana bixinayo ujeedooyin xayaaysiin toos ah la xidhiidha.

Magacyada dadka guuleysanaya lama shaacinayo.

Qabanqaabiyaha qoriturka mas'uuliyaddiisa

Qabanqaabiyaha qoriturka ayaa ka mas'uul ah cashuurta qoriturka ee macquulka ah. Qabanqaabiyaha qoriturka ayaa ka mas'uul ah kharashka boostada ah ee caadiga ah ee ka dhalan kara in billadda lagu diro cinwaan ku yaalla Finland.

Qabanqaabiyaha qoriturka waajib kuma aha inuu magdhow bixiyo, haddii dadka guuleystay aanay isticmaali karin billadaha.

Shuruudaha kale

In laga qaybqaato qoriturka ayuu qofku ugu hoggaansamayaa sharciyadan qabanqaabiyuhuna wuxuu sharciyada ku salleynayaa go'aamada uu gaadhayo.

Ka qaybqaataha ayaa ka mas'uul ah in macluumaadka uu bixiyay markii uu ka qaybqaadanay ay sax yihiin.

Haddii ka qaybqaataha qish looga shakiyo ama waxqabad kale oo sharciyada ka baxsan, wuxuu qabanqaabiyuhu xaq u leeyahay inuu baajiyo ka qaybqaadashadiisa oo uu ka saaro qoriturka. Sharciyadan dabaqaaddooda iyo fasiraaddooda madmadowga la xidhiidha ee macquulka ah waxaa cadeynaya qabanqaabiyaha qoriturka.

